QODOBADA RASMIGA AH EE KULANKA ISKU DHAFKA FOGAAN ARAGA IYO FOOL-KA-FOOLKA AH EE GUDDIGA DUGSIYADA BOSTON

Oktoobar 18, 2023

Guddiga Dugsiyada Boston waxay qabteen kulan isku dhaf khadka tooska ah iyo fool ka fool ah Oktoobar 18, 2023 saacadu markay ahayd 6 p.m. oo lagu qabtay Bruce C. Bolling Municipal Building, 2300 Washington Street, School Committee Chamber, Roxbury, Massachusetts. Kulanka ayaa sidoo kale si toos ah looga tabiyay Boston City TV iyo aaladda Zoom. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mid ka mid ah sheeyaasha hoos ku taxan, booqo.bostonpublicschools.org/schoolcommittee, iimayl ugu dir esullivan3@bostonpublicschools.org ama ka wac Xafiiska Guddida Dugsiyada Boston (617) 635-9014.

KA SOO QEYBGALAYAASHA

Xubnaha Guddiga Dugsiga ee soo xaadiray: Gudoomiye Jeri Robinson; Gudoomiye ku Xigeenka D. O'Neill; Stephen Alkins; Brandon Cardet-Hernandez; Chantal Lima Barbosa; Rafaela Polanco Garcia; Quoc Tran; iyo Wakiilka Ardayda Diego Mehta.

Xubnaha Guddiga Dugsiga ee Maqanaa: Midna

DHUKUMIINTIYADA LASOO BANDHIGAY

Ajandaha

Qodobada kulanka: Wadahadalka Oktoobar 4, 2023; iyo Oktoobar 5, 2023

Warbixinta Dugsiyada Isbeddelka Rubuca 1, Farriinta Sanad Dugsiyeedka 2023-2024

Bayaanka Saameynta Sinnaanta Warbixinta Dugsiyada Isbeddelka Rubuca 1

Bandhigga PowerPoint ee Warbixinta Dugsiyada Isbeddelka Rubuca 1

Farriinta Qorshaha Waxbarashada Loo Dhan yahay

Bayaanka Saameynta Sinnaanta Warbixinta Waxbarashada Loo Dhan yahay

Qorshaha Waxbarashada Loo Dhan Yahay ee Dugsiyada Dadweynaha ee Boston

Bnadhigga PowerPoint ee Waxbarashada Loo Dhan Yahay

FURITAANKA KULANKA

Kulanka Isku Dhafka ee Guddiga Dugsiyada Boston

Bruce C. Bolling Municipal Building
2300 Washington Street
Rugta Guddiga Dugsiga
Roxbury, MA 02119

Oktoobar 18, 2023
Gudoomiye Jeri Robinson ayaa shirka furay oo hormuud u noqday ballan qaadka. Waxay sheegtay in kulanka caawa si toos ah looga tabinayo Boston City TV iyo Zoom. Waxaa dib looga baahin doonaa muuqaalkana la soo dhigi doonaa bostonpublicschools.org/schoolcommittee iyo YouTube. Waxay ku dhawaaqday in adeegyo tarjumaad isku mar ah lagu heli karo Isbaanishka, Haitian Creole, Cabo Verdean, Vietnamese, Cantonese, Mandarin iyo Luqadda Dhagoolaha (ASL). Dukumiintiyada laturjumay ee shirka ayaa la soo dhigay bostonpublicschools.org/schoolcommittee kahor inta uusan shirku bilaabmin.

Kormeere Guud Skipper waxay la wadaagtay xoogaa dib-u-milicsi ah oo ku saabsan weerarki naxdinta lahaa ee ay Xamaas ku qaaday dadka reer Israa'iil iyo dagaalka iyo qalalaasaha bani'aadamnimada ee ka socda Qasa. Waxa ay la kulantay Kormeerayaasha Guud ee Dugsiyada Gobolka iyo madaxda dugsiyada si ay ugala hadasho kheyraadka loogu talagalay ardayda ay siyaabaha kala duwan u saameysay, una baahan ka caawinta qaadashada waxa ay arkaan ayna maqlayaan. Xafiiska Taageerada Ardaygu wuxuu qeybiyay qorshooyinka casharka khuseeya ee da'da ku habboon, iyo kheyraad kale si looga caawiyo barayaasha, shaqaalaha bulshada, iyo shaqaalaha kale inay kobciyaan fahamka ardayda iyo samaqabka bulshada iyo shucuurta. Kormeeraha Guud waxay sheegtay in aan dhamaanteen ka feejignaano kororka suurtagalka ah ee naceybka Yuhuuda iyo Islaamka iyo in BPS aysan u dulqaadan doonin takoor nooc kasta uu noqdaba. Xafiiska Sinnaanta waxa uu diyaar u yahay inuu taageero bixiyo haddii loo baahdo waxa uuna si dhow ula socdaa dhacdo kasta oo dhici karta. Waxay u duceysay dhammaan dadka ay dhibaatada ka soo gaartay rabshadan iyo dagaalkan. Waxay cadeysay taageerada ay degmadu u hayso bulshooyinka iskuulka.

XIGASHO

Guddiga iyo Kormeere Skipper waxay xigasho u bandhigeen Yvrose Bourdeau, macalimad labo-luuqadood ka ah Dugsiga Hoose ee Mattahunt, taasoo dhawaanAbaalmarinta Shattuck ee 2023 ay siiyeen Xafiiska Cilmi-baarista Dawladda Hoose ee Boston.

ANSIXINTA QODOBADA KULANKA

La ansixiyey – Guddigu wuxuu si aqlabiyad ah ku ansixiyey ogolaashaha qodobada kulanka Guddiga Dugsiga ee Oktoobar 4, 2023 iyo Wadahadalka Guddiga Dugsiga ee Oktoobar 5, 2023.

WARBIXINTA KORMEERAHA GUUD

Sida loogu diyaariyey gudbinta.

Waad ku mahadsan tahay Guddoomiye Robinson fiidnimo wanaagsan. Ka dabagal ahaan doodi wadahadalka Guddiga Dugsiga ee ku aadan dib uga fikirka ajendaha kulanka, waxaan isku dayayaa inaan warbixinta kormeerahayga guud ka dhigo mid aad u kooban. Warbixinta Kormeeraha Guud ee caawa waxaa ku jira warbixino degdeg ah oo dhawr ah iyo dhowr meelood oo iftiimin ah. Mardhow, waxaad maqli doontaan warbixino ku saabsan Dugsiyada Isbedelka iyo Waxbarashada Loo Dhan Yahay.

Waxaan rabaa in aan ku bilaabo anigoo la socodsiinayo xubanaha in aan ku guda jirno soo aruurinta macluumaadka xubnaha Guddiga ay codsadeen ee ku saabsan soo jeedinta Guddiga Shaqada ee Dugsiga Imtixaanka ee in lagu abaalmariyo dhibco dheeraad ah si loo hubiyo in dhammaan xubnaha iyo dadweynaha ay haystaan macnaga taariikhiga ah iyo fikradda ka dambeysa go'aannada siyaasadeed iyo talooyinka

wakhtigaas. Waxaan rajeyneynaa in aan haysano macluumaadkaas oo diyaar u ah in la wadaago kahor kulankeena xiga waxaana ku jiri doona:

- Soo koobida iyo jadwalka wada-tashiyada Kooxda Hawsha Dugsiga ee Imtixaanka ka hor tallo bixinta siyaasada aqbalaada ee hadda oo ay ku jiraan asalka iyo tixgelinada buundooyinka dheeraadka ah.

- Jadwalka labada habraac ee oggolaanshaha qoysaska, iyo sidoo kale marka xubnaha guddiga dugsiga ay filan karaan inay helaan xogta ku saabsan martiqaadyada iyo natiijooyinka ardayda wareegga ogalaanshaha xiga ee soo socda

- Iyo xoogaa xogta dheeraadka ee lagaga jawaabayo su'aalaha xubnaha guddiga ee ku saabsan heerka faa'ida-darada dhaqaale iyo heerka martiqaadka, iyo sidoo kale farqiga u dhexeeya ciwaanka I iyo dugsiyada aan ciwaanka I ahayn iyo sidoo kale su'aalaha ku saabsan dhibcaha iskudhafan ee ugu yar heer kasta.

Waxaan lawadaagi doonaa Guddiga iyo dadweynaha markay soo dhamaato.

Jimcihii, Oktoobar 13, BPS waxay soo gudbisay Waxqabadkeena Waqtigii Loogu Talagalay ee bilaha ah - ama fariin qoraalka gaadiidka OTP-ga- ee loo diro DESE oo qeyb ka ah Qorshaha Horumarinta Nidaamsan (SIP). Kahor inta aan la xisaabin dariiq kasta oo ka maqan xogta GPS ka, waxqabadka waqtigii loogu talagalay ee bisha Sibteembar wuxuu ahaa sida soo socota:

- Subixi, 84 boqolkiiba basaska waxay ku tageen waqtigii loogu talagalay, 96 boqolkiiba basaska waxay yimaadeen 15 daqiiqo gudahood waqtigii loogu talagalay, halka 99 boqolkiiba basaska ay ku yimaadeen 30 daqiiqo gudahood waqtigii loogu talagalay
- Galabti, 83 boqolkiiba basaska waxay ku tageen waqtigii loogu talagalay, 95 boqolkiiba basaska waxay yimaadeen 15 daqiiqo gudahood waqtigii loogu talagalay, halka 98 boqolkiiba basaska ay ku yimaadeen 30 daqiiqo gudahood waqtigii loogu talagalay

Intaa waxaan sii dheer, 2.5 boqolkiiba safarada qorsheysan ee subaxii iyo 2.4 boqolkiiba safarada la qorsheeyay ee galabkii ayaa ka maqnaa xogta wakhtiga imaatinka. OTP-ga loo sheegay DESE, safarradan ka maqan xogta waxaa lagu tiriyaa kuwo soo daahay - sidii caadada ahayd. Sidaas awgeed, ka dib marka la xisaabiyo xogta maqan, waxqabadka Gelinka Hore ee wakhtigii loogu talagalay ee loo sheegay DESE Sibteembar 2023 wuxuu ahaa 81.8 boqolkiiba. Bishii udambeysay xogteeda marka loo barbar dhigo sibteembar 2022 waxay muujinaysaa horusocod muhiim ah. Boqolkiiba xogta GPS ee maqan ayaa la dhimay in ka badan kala bar - 5.8 boqolkiiba Sibteembar 2022 marka la barbar dhigo 2.5 boqolkiiba bishi Sibteembar 2023. Waxqabadka waqtigii loogu talagalay ee loo sheegay DESE ayaa sidoo kale si aad ah u kordhay, laga bilaabo 76.4 boqolkiiba bishii Sibteembar ee hore ilaa 81.8 boqolkiiba bishan Sibteembar.

Iyada oo ay ugu wacantahay shaqada la qabtay ee lagu shaqaaleysiiyay laguna tababaray darawallada basaska si ay dib ugu soo noqdaan shaqaalanimadooda buuxda, ma jirin safarro bishii Sibteembar oo aan lahayn caymis darawalnimo. Hal safar oo Gelinka Hore ah iyo labo safar oo Gelinka Dambe ah ee bishi Sibteebar uma socon cillad hawlgal darteed. Mid kasta oo ka mid ah tusaalayaashaan ayaa si gaar ah loo dabagalay.

Ugu dambeyntii, waxaan sii wadaynaa inaan horumar xooggan ka sameyno shaqaalaha kormeerka baska. Waxaan ku bilownay sannad dugsiyeedkan ku dhawaad 200 oo kormeerayaal baska oo ka badan sanadkii hore. Waxaan sidoo kale hirgelinay qaab caymis daboolis cusub oo diirada lagu saarayo xaqiijinta ugu yaraan hal kormeer bas oo saaran bas kasta oo qaada ardayda naafada ah. Waxaan sii wadnay inaan si dhow diiradda u saarno shaqaaleysiinta, oo hadda aan haysanno 65 dheeraad ah oo kormeerayaal bas ah oo la sugayo, si aan u xaqiijino inaan si buuxda u buuxinno dhammaan baahiyaha ardayda. Waxaan rabaa inaan bogaadiyo dadaalka

Kulanka Isku Dhafka ee Guddiga Dugsiyada Boston

Bruce C. Bolling Municipal Building
2300 Washington Street
Rugta Guddiga Dugsiga
Roxbury, MA 02119

Oktoobar 18, 2023
ay kooxda Gaadiidka BPS sida buuxda ee ay uga go'an tahay yoolalka ujeedooyinka aan wadaagno iyo samaynta horumar joogto ah inta aan ka shaqaynayno gaarista yoolalkaas.

Waxaan rabaa inaan mar labaad ugu hambalyeeyo macalinka Dugsiga Hoose ee Mattahunt Yvrose Bourdeau Abaalmarinteeda Shattuck 2023. Marwo Bourdeau waxay siisaa qalbigeeda iyo nafteeda ardayda iyo qoysaska Mattahunt maalin kasta. Laga soo bilaabo abaabulka wax u aqrinta kooxaha qoysaska, fasalada Af-Ingiriisiga ee dadka waaweyn iyo Blue Hills la iska dhigto ilaa raashin gaarsiinta qoysaska, Marwo Bordeau waxay gacan ka gaysatay iney abuurto soo dhaweynta bulshada ee Mattahunt lagu yaqaano.

Dhawaanahaan waxaa la iigu sharfay inaan gacan ka geysto fulinta rabitaanka William Gerald Chase, kaasoo ka tagay Dugsiga Sare ee Brighton sanadka markuu ahaa 1943 si uu ugu adeego Ciidanka Badda Mareykanka intii lagu jiray Dagaalkii Labaad ee Adduunka. Mudane Chase wuxuu ka tagay dugsiga kahor inta uusan helin dhibloomadiisa. Wey ku mahadsan yihiin shakhsiyaadka naxariista leh ee BPS sida hoggaamiyaha dugsiga sare ee Brighton Andrew Bott iyo xubnaha ka tirsan iskuulkeena sare, kooxaha hagista iyo tiknolojiyadda, dhibloomadi Mudane Chase waxaa u soo bandhigay Guddoomiyaha Adeegyada Halyeeyada ee magaalada Roberto Santiago iyo Madaxweynaha Golaha Magaalada Ed Flynn, labada ah halyeeyadii ciidamada badda. Waxaan aad ugu faraxsanahay Mudane Chase waxaana aad iyo aad ugu mahadcelineynaa adeegiisii. Ku soo dhowow fasalka 2023!
Talaadadii, Oktoobar 11-keedii, Xafiiska Dhexe ee BPS wuxuu maamuusay Bisha Dhaxalka Isbaanishka oo lagu maamuusay cunno, muusig, khudbado marti-sharaf iyo bandhigga qoob-ka-ciyaarka ee ay sameeyeen Kooxda Hyde Square Task Force oo ay ku jireen ardayda BPS. Martida qaaska ah waxaa ka mid ahaa Gudoomiyaha Gudiga Dugsiga Robinson iyo xubin Polanco Garcia iyo sidoo kale Xildhibaanka wayn ee golaha deegaanka Boston Julia Mejia.

Kaliya xusuusin in ay tahay Bishka Kullejka iyo Xirfadda BPS. Fadlan nagula soo biir Bandhigga Kulleejka Magaalada Dhan, Xirfadda, iyo STEM oo dhacaya Sabti, Oktoobar 21keeda laga bilaabo 10:00 subaxnimo ilaa 1:30 duhurnimo oo ka dhacaya Reggie Lewis Track and Athletic Center ee ku taala 1350 Tremont Street ee Roxbury.

Kahor inta aanan soo xirin, waxaan jeclaan lahaa inaan xoogaa yar qaato si aan isu xasuusino nolosha iyo shaqada madaxii hore ee dugsiga BPS, macallin, maamule iyo tababare Michael Donato oo geeryooday bishii hore. Mudane Donato waxaa lagu xasuusan doonaa doorarkiisii hore ee dugsiyada sare ee Boston Tech iyo Roslindale iyo hogaankii joogtada ahaa ee uu ka soo qabtay Dugsiga Sare ee Hyde Park intii lagu jiray xasradihi ka taagnaa basaska. Tan ugu muhiimsan, Mudane Donato waxaa si qadarin leh u xasuusan doona asxaabtiisa iyo arday fara badan oo uu soo garab qabtay lana taliyay inti uu noolaa oo dhan. Waxaan Mudane Donato uga mahadnaqeynaa dadaalki uu ku bixiyey ardaydeena. Waxaan xanuunka la qeybsaneynaa qoyskiisa iyo asxaabtiisa inta aan maamuuseyno noloshiisii.

Waxaan rabaa inaan xoogaa yar la hadlo ardayda halkan ku sugan caawa. Waad ku mahadsan tihiin in aad u timaadeen in aad marag ka noqotaan, gaar ahaan habeen dugsi. Inbadan oo idinka mid ahi waxay waqti ka qaadanayaan shaqada guriga iyo waajibaad kale si aad noola hadashaan. Waan ogsoonahay in aad qorsheyneysaan in aad ka hadashaan arrimo muhiim ah oo saameynaya bulshada dugsigiina. Waxaan halkan u joognaa in aan idin dhageysano. Ardayda O'Bryant ee caawa halkan joogta, waan ogahay inay jiraan wadahadalo kale oo lala qorsheeyay shaqaalaha degmada toddobaadyada soo socda labadaba si loo booqdo faraca xarunta West Roxbury Education Complex (WREC) lana sii wado wada-hadalkan. Waxaan rajeynayaa in aan idin maqlo caawa iyo kadib kulamadaas. Waxaan aad ugu riyaaqsanahay dadaaladiina u doodista. Had iyo jeer waan idin dhageysan doonaa oona taageeri doonaa xaqa aad u leedihiin in aad hadashaan oo aad fikirkiina cabbirtaan. Intan ayaan ku gabagabeeyay warbixinteyda. Adiga ayaan kugu soo celiyay hadalka, Marwo Gudoomiso. _____

Bruce C. Bolling Municipal Building
2300 Washington Street
Rugta Guddiga Dugsiga
Roxbury, MA 02119

Oktoobar 18, 2023
Dr. Alkins ayaa weydiiyey macluumaad ku saabsan saameynta barnaamijyada xagaaga. Kormeeraha Guud ayaa sheegtay in ay bayaan ku soo bandhigi doonto macluumaadka. Dr. Alkins wuxuu weydiiyay sida BPS ay u caawineyso ardayda iyo barayaasha inay la qabsadaan xaalada ka taagan Bariga Dhexe. Kormeeraha Guud ayaa sheegtay in kooxdeeda ay la shaqeyneyso hoggaamiyeyaasha dugsiga si ay ardayda loo siiyo taageero ballaaran oo ka timaadda ilaha dhijitaalka ah iyo shaqaalaha bulshada.

Mudane O'Neill ayaa sheegay in uu rajeynayo inuu helo xogta ogolaanshaha imtixaanaadka dugsiga, gaar ahaan kala duwanaanshaha u dhexeeya dhibcaha iskuulada Title One iyo iskuulada aan Title One aheyn marka loo barbardhigo tirada la iska qaatay ee horay loo xushay. Wuxuu codsaday akhbaar ku saabsan waxqabadka gaadiidka. Agaasimaha Gaadiidka Dan Rosengard ayaa xusay in xogta gaadiidka aan la gabagabeyn ilaa BPS ay u gudbiso DESE, si kasta oo ay noqotaba, laakiin illaa iyo hadda Oktoobar BPS waxay celcelis ahaan 89% ka joogtaa xagga waxqabadka ku imaanshaha gaadiidka ee waqtigii loogu talagalay ee subixi iyo 87% galabtii ka hor inta aan laga jarin wixi GPS ah ee maqan. Wuxuu sheegay in BPS aysan wax dhibaato ah ka qabin bixinta gaadiidka loogu talagalay ciyaaraha fudud iyo safarada aqoon kororsiga ah ee sanadkan sababtoo waxay si buuxda u shaqaaleysiisay darawalo ku filan. Mudane O'Neill wuxuu faallo ka bixiyey maamulihi hore ee Dugsiyada Sare ee Hyde Park Michael Donato sidi uu ugu adeegay dugsiyada BPS.

Marwo Robinson waxay wayddiisay haddii wax qaabab ah ay ka soo baxayaan xogta waxqabadka gaadiidka. Mudane Rosengard wuxuu sheegay inkasta oo basaska daaha ay yihiin arrimo hal mar ah, ay jiraan wadooyin hoosaadyo laga ogaaday inay ka jiraan dhibaatooyinka salka u ah oo ay BPS kala shaqeyneyso Transdev si wax looga qabto.

Mudane Cardet-Hernandez wuxuu weydiiyay hadii bayaanka is-qorista ee iskuul imtixaanaadka soo socda ay ku dari doonaan wax talooyin ah. Kormeeraha Guud waxay sheegtay in bayaanku bixin doono macluumaad taariikheed iyo sidoo kale fikradda ka dambeysa siyaasada. Mudane Cardet-Hernandez wuxuu weydiiyay hadii bayaanku wax ka qaban doono in degmadu sahamisay iyo in kale ama ay sahamin doonto xiriirka ay la leedahay gobolka si loogu ogolaado BPS inay hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan dhaqanka-dhaqaale ee ardayda. Kormeeraha Guud waxay sheegtay in bayaankan gaarka ah uusan ku dari doonin macluumaadkaas balse degmadu ka shaqeyn doonto inay aragto waxa suurtagalka ah.

Mudane Cardet-Hernandez wuxuu soo jeediyay in boodhka Qiimeynta Xaaladaha Xarumaha (FCA) ay ku jiraan macluumaad dheeri ah oo ku saabsan waxa xogta ay ka sheegeyso dhibcaha iyo waxa ay tahay qiimeynta degmada ee xogtaas. Kormeeraha Guud waxay mudane Cardet-Hernandez uga mahadcelisay jawaab-celinta waxayna sheegtay in kooxdu ay sharraxaad dheeraad ah ka bixin doonto goobta. Kormeeraha Guud waxay mudane Cardet-Hernandez u caddeysay in boodhka FCA uu noqon doono mid ka mid ah dhowr qeybood oo ka xogsiiya xarumaha xagga halbeegga go'aan qaadashada.
Mudane Tran wuxuu codsaday in la caddeeyo macluumaadka lagu dari doono bayaanka is-qorista ee iskuul imtixaanaadka. Kormeeraha Guud waxay sheegtay in bayaanku bixin doono macna guud oo taariikheed iyo sidoo kale xogta Title I.

Waa La Ansixiyey - Guddigu wuxuu oggolaansho mideysan ku ansixiyay Warbixinta Kormeeraha Guud.

FAALLADA DADWEYNAHA EE GUUD

Dadka soo socdo waxay ka marag fureen soo jeedinta ah in John D. laga beddelo Iskuulka O'Bryant ee Xisaabta iyo Sayniska loona beddelo xarun dib loo cusboonaysiiyay oo ku taal xerada faraca West Roxbury Education Complex:

- Jayme Martin, deggan Roxbury oo arday ka ah Dugsiga O'Bryant ee Xisaabta iyo Sayniska

Bruce C. Bolling Municipal Building
2300 Washington Street
Rugta Guddiga Dugsiga
Roxbury, MA 02119

Oktoobar 18, 2023

- Arianny Ramos, deggan Dorchester oo arday ka ah Dugsiga O'Bryant ee Xisaabta iyo Sayniska
- Sara Blanco, deggan Bariga Boston oo arday ka ah Dugsiga O'Bryant ee Xisaabta iyo Sayniska
- Stiven Maldonado, deggan Allston oo arday ka ah Dugsiga O'Bryant ee Xisaabta iyo Sayniska
- Mary Matero, deggan Galbeedka Roxbury oo arday ka ah Dugsiga O'Bryant ee Xisaabta iyo Sayniska
- Isabella Pedroza Muñoz, deggan Mattapan oo arday ka ah Dugsiga O'Bryant ee Xisaabta iyo Sayniska
- Anissa Adeyanju, deggan Dorchester oo arday ka ah Dugsiga O'Bryant ee Xisaabta iyo Sayniska
- Aliyah Mahmoud, deggan Quincy oo macalin ka ah Dugsiga O'Bryant ee Xisaabta iyo Sayniska
- Liza Cagua-McAllister, deggan Roslindale oo waalid ka ah Dugsiga O'Bryant ee Xisaabta iyo Sayniska
- Dinah Shepherd, deggan Jamaica Plain oo waalid ka ah Dugsiga O'Bryant ee Xisaabta iyo Sayniska
- Paulena Papagiannis, deggan Somerville oo macalin ka ah Dugsiga O'Bryant ee Xisaabta iyo Sayniska
- Aparna Lakshmi, deggan Roslindale oo macalin ka ah Dugsiga O'Bryant ee Xisaabta iyo Sayniska
- Krista McKee, deggan Beacon Hill oo waalid ka ah Dugsiga O'Bryant ee Xisaabta iyo Sayniska
- Francis Pina, deggan Malden oo bogay Dugsiga O'Bryant ee Xisaabta iyo Sayniska
- Kiesha Santana, deggan Brighton oo bogtay Dugsiga O'Bryant ee Xisaabta iyo Sayniska
- Gretchen Nash, deggan Galbeedka Roxbury oo waalid ka ah Dugsiga O'Bryant ee Xisaabta iyo Sayniska
- Valerie Copeland, deggan Mattapan oo bogtay BPS

Dadkan soo socda ayaa ka marag furay walaaca ku saabsan siyaasadda hadda jirta imtixaanka dugsiyada ee ardayd cusub lagu aqbalo:

- Elizabeth Nothnagle, deggan Charlestown oo arday ka ah BPS
- Grace Nothnagle, deggan Charlestown oo arday ka ah BPS
- Alana Susi, deggan Charlestown oo arday ka ah BPS
- Emmeline Knight Bairstow, deggan South End oo arday ka ah Dugsiga Hal-abuurka ee Eliot K-8
- Fallon Perez, deggan North End oo arday ka ah Dugsiga Hal-abuurka ee Eliot K-8
- Tatum Donovan, deggan Koonfurta Boston oo arday ka ah Dugsiga Hal-abuurka ee Eliot K-8
- Isabel Gali, deggan Charlestown oo arday ka ah Dugsiga Hal-abuurka ee Eliot K-8
- Kathleen Chardavoyne, deggan Charlestown oo waalid ka ah Dugsiga Hal-abuurka ee Eliot K-8
- Monica Borgida, deggan Charlestown oo waalid ka ah Dugsiga Hal-abuurka ee Eliot K-8

John Mudd, deggan Cambridge oo u doode ah, ayaa ka marag furay Qorshaha Istiraatiijiyadeed ee OMME iyo Qorshaha Waxbarashada Loo Dhan Yahay

WARBIXINO

Warbixinta Dugsiyada Isbeddelka: Rubuca 1, Sanad Dugsiyeedka 2023-2024 - Agaasimaha Fulinta ee Degmada iyo Dugsiga Isbeddelka Mike Sabin ayaa soo bandhigay warbixintii ugu horreysay ee 2023-24 ee saddex-biloodlaha ah ee ku saabsan Dugsiyada Isbeddelka ee degmada, ee fulinaya mid ka mid ah shuruudaha Qorshaha Hagaajinta Nidaamka. Dugsiyada Isbeddelka waa dugsiyada BPS oo ay Waaxda MA ee Waxbarashada Hoose iyo Sare (DESE) u aqoonsatay inay "u baahan yihiin caawin ama wax ka qabasho." Cusboonaysiinta waxaa diiradda lagu saaray saddexda aag ee Qorshaha Dugsiga Tayada (QSP) ee mudnaanta la siinayo ee Akhris-qoraalka Loo Siman yahay, Cimilada iyo Dhaqanka, iyo Soo Xaadiritaanka. Hadafka degmada ee Dugsiyada Isbeddelka waa sare u qaadida sinnaanta iyo baabi'inta faraqa u dhexeeya fursadaha iyo guusha iyadoo taageero dheeraad ah la siinayo dugsiyada ugu waxqabadka hooseeya ee degmada.

Kulanka Isku Dhafka ee Guddiga Dugsiyada Boston

Bruce C. Bolling Municipal Building
2300 Washington Street
Rugta Guddiga Dugsiga
Roxbury, MA 02119

Oktoobar 18, 2023
Marka loo barbardhigo dugsiyada aan ahayn Dugsiyada Isbeddelka, Dugsiyada Isbeddelka waxaa dhigta tiro boqolley sare oo ah ardayda dhaqaale ahaan liidata (85%); inbadan oo ardayda naafada ah (28%) iyo Bartayaasha Af-Ingiriisiga (38%); tiro boqolley sare oo ah ardayda baahida sare leh (95.2%); iyo qeyb weyn oo ka mid ah ardayda Madow (36%) iyo ardayda Laatiinka (50%).

Aragtida Xogta Muhiimka ah ee Dugsiyada Isbeddelka ee 2023 marka la barbar dhigo 2022:

- Hormar sare (SGP) ee Xisaabta Fasalka 3-8 iyo ELA ee imtixaanka MCA ee 2023
- Hormar hoose (SGP) ee ee Xisaabta Fasalka 10 iyo ELA ee imtixaanka MCA ee 2023
- Guulo sare ee imtixaanka MCA ee 2023 (Dhibcaha La Cabbiray) ee Xisaabta ee labada heerba iyo ELA-ga dugsiga sare
- Kobac soo hagaagay ee Bartayaasha Af-Ingiriisiga ee ACCESS balse % hoose ee horumar ka sameynta dugsiga sare
- Maqnaanshaha joogtada ah oo la dhimay labada heer (laakiin weli aad u sareeya)

Laga soo bilaabo 2022 ilaa 2023, 15 Dugsiyada Isbeddelka ee BPS ayaa hagaajiyey boqolkiiba la xisaabtanka gobolka, saddex iskuul sidooda ayey ahaayeen, halka 8 iskuul ay hoos u dheceen.

Soo Gabagabaynada ku Salaysan Xogta:

- Caddeynta horumarka bilawga ah–iyo xaaladaha qaarkood horumar la taaban karo– inta badan Dugsiyada Isbeddelka.
- Cadaynta in Dugsiyada Hormarinta muujiyeen horumar ka badan sanadkii hore marka loo eego dugsiyada boqolleyda 11-20
- Daldalooda guusha ee muhiimka ah iyo kuwa dhibka leh ayaa weli jira, sidoo kale degdegga ah ee hagaajinta dardargelinta ee waxqabadka, hormarka iyo soo xaadiritaanka

Istaraatiijiyada Talaabooyinka Xiga ee Looga Jawaabayo:

- Balaarinta taageerada waxbarashada gobolka iyo hawlgelinta
- Xoojinta tababbarka waxbarashada ku salaysan dugsiga, taageerada soo xaadiritaanka iyo hirgelinta manhajka
- Balaarinta taageerada dugsiyada ee boqolleyda 11-20

Waxyaabaha Muhiimka ee Istaraatiijiyada Hormarin Ahaaneed ee Dusgiyada Isbeddelka ee BPS:

- Taageero Gobol Ahaaneed: Taageerada doorbidida leh ee ka imaaneysa xiriiriyaasha gobolka
- Qorshayaasha Tayada Dugsiga: Taageerada horumarinta iyo hirgelinta QSP
- Hoggaminta Macalinka: Maalgelinta iyo taageerada hogaamiyayaasha macalimiinta iyo kooxaha hogaaminta si ay u hogaamiyaan fulinta QSP iyo kormeeritaanka horumarka
- Indha-indheynta Dhaqanka: Kormeeritaan joogto ah oo lagu kormeerayo tillaabooyinka waxqabadka QSP, taageeridda hirgelinta manhajka lana waafajiyo taageerada gobolka
- Tababbarka Waxbarashada: Tababar waxbarasho oo dugsi ku salaysan oo socda
- Shaqaaleynta iyo Shaqo Qorista: Taageerada la beegsanayo ee shaqaaleysiinta, ruqsadaynta iyo shaqaalaynta
- Taagerada Soo Xaadiritaanka: Dadaalada iskaashiga ah ee wax looga qabanayo maqnaanshaha joogtada ah

WAXYAABAHA CUSUB EE SY 2023-24:

- Qaab-dhismeedka degmada ee 'filashooyinka caalamiga' iyo 'horumarka dib u eegista' si loo xoojiyo qorshaynta istiraatijiyadeed ee dugsiga ku salaysan iyo ka jawaabista xogta la socodka horumarka

Kulanka Isku Dhafka ee Guddiga Dugsiyada Boston

Bruce C. Bolling Municipal Building
2300 Washington Street
Rugta Guddiga Dugsiga
Roxbury, MA 02119

Oktoobar 18, 2023

- Taageerada la balaariyay ee dugsiyada ee boqolleyda 11-20
- Horumarinta siyaasadda "Habraaca" ee dugsiyada oo muujinaya horumar waara

BPS waxay u qoondeysay $10,792,482 si ay u taageeraan Dugsiyada Isbedelka ee sanad dugsiyeedka SY 23-24.

Dr. Alkins wuxuu weydiiyay Dr. Sabin sababta heerka taageerada waqti xaadirkan uusan u shaqeynaynin, khaasatan ardayda madowga ah marka loo barbardhigo kooxo-hoosaadyada kale. Dr. Sabin waxa uu xusay in ardayda madow ay muujiyeen kobac hoose oo xagga xisaabta ah balse aanay ahayn xagga akhris-qoraalka. Waxa uu sheegay in kooxdiisu ay qiimaynayso xogta dugsi ahaan iyo kooxo hoosaadyada iyagoo raadinaya qaababka ay isugu xigxigaan. Wuxuu sheegay in xiritaanka farqiga u dhexeeya koox hoosaadyadu ay tahay mudnaan koowaad.

Marwo Lima Barbosa waxay codsatay macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan taageerada imaanshaha. Dr. Sabin waxa uu sheegay in imaanshaha ay caqabad dhab ah ku tahay dugsiyada dalka oo dhan wuxuuna tafaasiil ka bixiyay hab degmo oo dhinacyo badan leh oo lagu kordhinayo imaanshaha, laga bilaabo qorshooyinka horumarinta dugsiga ilaa ka qeybqaadashada. Wuxuu sheegay inuu dabagali doono xogta gaarka ah ee dugsiga.

Mudane Cardet Hernandez waxa uu ku nuuxnuuxsaday muhiimada ay leedahay in Guddigu helo xogta dugsiga u gaarka ah. Dr. Sabin waxa uu xaqiijiyay in heerka kobaca ee hadda aanu u horseedi doonin in la yareeyo nusqaamaha guusha. Mudane Cardet-Hernandez waxa uu waydiiyay sida ay BPS u isticmaalayso dabacsanaanta gobolka iyo istiraatiijiyadaha nidaamyada wanaagsan. Dr. Sabin waxa uu sharaxay in Dugsiyada Isbeddelka ay leeyihiin dabacsanaan heerkeedu sarreeyo iyo in degmadu ay si gaar ah ula shaqaynayso dugsiyada si loo kordhiyo dabacsanaantaas iyo hal-abuur cusub. BPS waxay xooga saaraysaa yaraynta shaqo ka tagista macalinka iyo hogaamiyaha dugsiga iyo xoojinta waxbarashada si loo dardargeliyo koboca. Dr. Sabin waxa uu sheegay in degmadu ay ku guda jirto sidii loo ogaan lahaa kabaalada ugu awooda badan ee isbeddelka iyadoo diirada la saarayo manhaj tayo sare leh oo ay bixiyaan macalimiin xirfad leh iyo taageero tababarid. Kormeeraha waxay ka hadashay muhiimada ay leedahay in la joogteeyo taageerada dugsiyada ka baxa heerka leexashada iyo kordhinta taageerada dugsiyada ee boqolleyda 11-20. Mudane Cardet-Hernandez waxa uu ku dhiirigeliyay degmada in ay sahmiso in dugsiyada leh dabacsanaanta badan ay dardargelinayaan horumarka iyo, haddi ay sidaas tahay, in ay tixgeliyaan gaarsiinta dabacsanaantaas dugsiyada kale. Kormeeraha Guud waxay sheegtay in waxbarasho loo dhan yahay ay taageeri doonto dugsiyada, waxayna ku raacday inay degmadu caawiso dugsiyada si ay u kordhiyaan kaabayaasha lagu wadaayo horumarka.

Mudane O'Neill wuxuu weydiiyay Kormeeraha Guud waxa shaqaynaya iyo waxa ka walaaciyo iyada. Kormeeraha Guud waxay sheegtay inay ka walaacsan tahay guud ahaan ka soo kabsashada hooseysa ee musiibadi caabuqa. Waxay sharaxday in degmadu ay ka shaqaynayso inay u deegaameyso nidaamka oo dhan si wanaagsan iyo in la ogaado wax ka qabashooyinka waxa badan laga faa'iidayo. Mudane O'Neill wuxuu ku ammaanay Kormeeraha Guud qaabkeeda firfircoon ee ay u taageerto dugsiyada.

Marwo Robinson waxay waydiisay haddii taageerada dheeraadka ah ee lagu bixiyo dugsiyada isbeddel doonka laga dhigo mid joogto ah. Dr. Sabin wuxuu kahadlay macallimiinta tayada sare leh saameynta ay kuleeyihiin waxbarashada ardayga. Wuxuu sheegay in dugsiyada isbeddelka ay u janjeeraan in ay leeyihiin macallin tagis ka sarreysa dugsiyada isbeddelka aan ahayn, taas oo si xun u saamaysa ardayda. Degmadu waxa ay ka shaqaynaysaa sidii ay kor ugu qaadi lahayd qorista iyo tababarida si ay iskugu daydo in ay joojiso jahawareerkaas.

Kulanka Isku Dhafka ee Guddiga Dugsiyada Boston

Bruce C. Bolling Municipal Building
2300 Washington Street
Rugta Guddiga Dugsiga
Roxbury, MA 02119

Oktoobar 18, 2023
Mudane Mehta wuxuu waydiiyay sida ay BPS ula shaqaynayso hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn si ay uga faa'iidaystaan kheyraadka. Kormeeraha Guud waxay sheegtay in BPS ay sheegeen inay ka shaqaynayaan istaraatiijiyadaha lagu kasbanayo kheyraadka magaalada oo dhan si loo taageero dugsiyada. Iskuulada xarumaha waa hal tusaale oo iskaashigan ah.

Mudane Cardet-Hernandez ayaa waydiiyay sida BPS ay hal-abuurada iyo dabacsanaanta uga isticmaalayso dugsiyada leh baahiyaha sare. Kormeeraha Guud ayaa sheegtay in degmadu ay adeegsanayso xeelado badan, sida ka shaqaynta in ay shaqaaleysiiso shaqaale badan oo laba luuqadle ah iyo horumarinta barnaamijyada tubta macalimiinta ee ardayda ka qalinjabisay BPS. Mudane Cardet-Hernandez wuxuu ku dhiiri galiyay degmada in ay tixgaliso xeelado hal abuur leh sida in ay mushahar badan siiyaan macalimiinta ka shaqeeya dugsiyada baahida sare leh waayo waa shaqo aad u adag. Mudane Cardet-Hernandez ayaa waydiiyay sida xogta isbeddelka ugu habboon tahay wada-hadalka weyn ee Heshiiska Cusub ee Cagaaran. Kormeeraha Guud ayaa sheegtay in ay u cuskatay dhowr arrimood midkood.

Dr. Alkins wuxuu weydiiyay sida hogaamiyaasha iskuulka ay u awoodaan inay qiimeeyaan macalimiinta si ay ugu adkeystaan inay yihiin kuwa ugu haboon fasalka. Dr. Sabin wuxuu sheegay in kooxaha gobolka ay sameeyaan indho-indhayn waxbaris ka ahaan qeyb muhiim ah oo ka mid ah istiraatiijiyadda taageerada dugsiga degmada.

Waxbarashada Loo Dhan Yahay - Ku-xigeenka Kormeeraha Sare ee Tacliinta Linda Chen iyo Madaxa Adeegyada Gaarka ah Kay Seale waxay soo bandhigeen Qorshaha Waxbarashada Dadweynaha ee Boston, kaas oo horaantii bishaan loo gudbiyay Waaxda Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare ee Massachusetts (DESE) oo qeyb ka ah Qorshaha Hagaajinta Nidaamka. Dr. Chen iyo Marwo Seale waxaa ku weheliyey la-hawlgalayaasha Carolina Armstrong, Kuxigeenka Madaxa Waxbarista, Xafiiska Waxbarashada Luqadaha Badan & Dhaqamada Kala-duwan, Dr. Lesley Miller, Madaxa Waxbarista iyo Barashada, iyo Dr. Drew Echelson, Madaxa Iskuulada iyo La Xisaabtanka.

Qorshuhu wuxuu sharraxayaa isbeddelada nidaamsan ee dhammaan qeybaha BPS si loo xiro nusqaamaha ka jira fursadaha loona siiyo arday kasta fursad uu ku helo waxbaris adag oo dhaqan ahaan xaqiijinayo. Qorshuhu wuxuu si gaar ah diiradda u saarayaa bartayaasha luqadaha badan ku hadla, ardayda naafada ah, iyo bartayaasha luqadaha badan ku hadla ee naafada ah iyo ardaydeena Madow iyo Laatiinka ee taariikh ahaan la xaqiray. Waa uu ka baaxad weyn yahay qeexitaanka yar ee u dhannaanshaha, ee badanaa tixraacaya ardayda naafada ah. Fulinta buuxda ee qorshaha ayaa noqon doona dadaal sanado badan ah oo saameynaya heerarka fasalka, dugsiga, iyo Degmada.

Waxbarashada loo dhan yahay waxay u baahan tahay in arday kasta la siiyo shaqo koorso tayo sare leh, oo adag si loogu xujeeyo fasalka dhexdiisa, iyada oo la adeegsanayo taageero la beegsaday oo ku saleysan heerka baahidooda. Qorshuhu wuxuu sharraxayaa sida degmadu u bixin doonto kheyraad cusub, shaqaale, iyo taageero lagu beddelo waxbarista fasalka. Qorshahan Waxbarashada Loo Dhan Yahay wuxuu wax ka beddeli doonaa natiijooyinka waxbarashada ee dhammaan ardayda, isagoo taageeraya xuquuqda arday kasta u leeyahay inuu wax ku barto deegaanka ugu xaddidaada yar.

Qorshuhu wuxuu ku bilaabmayaa isagoo qiraya taariikhda Degmada ee salka ku haysa kala-duwanaansho isir oo nidaamsan oo taariikh ahaan xaddida helitaan iyo natiijooyin caddaalad ah ee kooxo arday ah oo gaar ah. Taariikhda iyo dhaqamada hadda jira waxay u horseedeen ardayda labka ah ee Madow in inkabadan saddex jeer u badan tahay in lagu aqoonsado daciifnimo shucuureed oo si aan xaq ahayn loogu meeleeyo goob si aad uga duwan kuwa facooda ah, halka bartayaasha luqadaha badan ku hadla ay labo iyo bar jeer u badan tahay in lagu aqoonsado naafo wada-xiriir oo si aan xaq ahayn loogu meeleeyo goob si aad u gooni ah. Qorshaha Waxbarashada Loo Dhan Yahay wuxuu ka shaqeynayaa sidii loo xaqiijin lahaa in ardayda aan laga soocin facooda isla markaana taa bedelkeeda wuxuu taageero dheeraad ah oo khaas ah ku siinayaa fasalo loo dhan

yahay. Iyadoo la bixinayo adeegyo dhamaystiran oo joogto ah, BPS waxay xaqiijin doontaa in arday kasta iyo qoys kasta ay helaan khibrad arday oo tayo sare leh oo guriga u dhow, iyada oo aan loo eegin luqadda ama naafanimada.

Cilmi baaris tacliimeed waxay muujineysaa in ardayda naafada ah, oo ay ku jiraan Bartayaasha Luqadaha Badan ku hadla, ee wax ku soo bartay goobaha loo dhan yahay ay keenaan natiijooyin waxbarasho oo wanaagsan oo dugsiga ah iyo natiijooyin hagaagsan oo xagga qalinjebinta shahaadada koowaad ee jaamacada ah. Natiijooyinka cilmi-baarista waxay sidoo kale tilmaamayaan in ardayda aan naafada ahayn ee ka barbar wax bartay ardayda naafada ah midkoodna uusan la kulmin wax saameyn ah ama saameyn togan ku yeelatay horumarkooda waxbarasho.

Warbixinta DESE ee 2023 ee Warbixinta Korjoogteynta Diirada Saarka Heerarka ah waxaa lagu ogaaday in ardayda qaar ay dareemeen faquuq sababtoo ah waxay la'yihiin fursado ay kula falgalaan facooda waxna la bartaan ardayda aan la wadaagin afkooda iyo dhaqankooda. Warbixinta ayaa sheegeysa "Intaa waxaa dheer, ardayda qaarkood ee ku jira barnaamijyada SEI ee 'luuqad-u-gaar ah' ama 'luuqadaha badan' ay sheegeen inti lagu guda jiray kooxaha diiradda in ay dareemaan in ay ku go'doonsan yihiin barnaamijyadan sababtoo ah ma haystaan fursado ay kula falgalaan asxaabtooda ku hadla Ingiriisiga oo ay si wadajir ah wax kula bartaan ardayda aan la wadaagin luuqad iyo dhaqan. Ardayda qaar ayaa sidoo kale la wadaagay in qaab-dhismeedkani uu caqabad ku yahay horumarka luuqada Ingiriisiga siina adkeynayo inay dareemaan dareen ka tirsanaan ah xitaa marka ay ka baxaan fasaladaan."

Qorshaha Waxbarashada Loo Dhan Yahay wuxuu doonayaa inuu kordhiyo dhammaan dareenka katirsanaanta ardayda ee bulshada iskuulkooda, isagoo siinaya ardayda oo dhan fursad ay wax ugu bartaan deegaanka ugu xaddidaada yar, oo leh taageerooyin munaasib ah.

Qorshaha Waxbarashada Loo Dhan Yahay wuxuu sharraxayaa afar isbeddel oo waaweyn oo ku saabsan dhaqamada ay tahay in BPS ay sameyso si loo hubiyo in dhammaan iskuulada BPS ay bixiyaan adeegyo joogto ah si BPS ay u noqoto degmo buuxisa baahiyaha ardayda oo dhan:

1. **Waxbarashada heerka-fasalka iyo agab waxbarasho oo tayo sare leh**
   Qorshaha Waxbarshada Loo Dhan Yahay wuxuu xaqiijinayaa in ardayda oo dhami ay heli doonaan qalab adag, oo heer fasal ah. Helitaanka afka hooyo ayaa lagu heli doonaa xirfadlayaasha labada-luqadeed ee tababaran, agabyada waxbaridda tarjuman ee la qaatay, iyo adeegsiga istiraatiijiyadeed ee macallimiinta dhiga Af-Ingiriisiga ka Luuqad Labaad ahaan (ESL) ee afka hooyo ku adeegsanayaan fasalka dhexdiisa. Ardayda naafada ah waxay marin u heli doonaan waxbaris si gaar ah loogu talagalay, iyadoo la xaqiijinayo marin u helka manhajka heerka-fasalka iyo fursadaha waxbarashada. Dhammaan ardayda waxay heli doonaan waxbarashadan heerka adag, dhaqan ahaan lagu xaqiijinayo. Si loo gaaro dib u habeyntan degmada dhan ah, BPS waxay xaqiijin doontaa in iskuul walba uu ku qalabeysan yahay qalab tayo sare leh oo waxbarid ah, barayaasha iyo shaqaaluhu waxay heli doonaan horumarin xirfadeed oo dheeri ah iyo qaab-dhismeedyada taageerada, degmaduna waxay sii wadi doontaa inay dardargeliso istiraatiijiyaddeeda akhris-qoraalka loo siman yahay.

2. **Gaarsiinta loo dhan yahay ee wax ka qabashada, taageerooyinka, iyo adeegyada**
   Qorshaha Waxbarshada Loo Dhan Yahay wuxuu doonayaa inuu xaqiijiyo in ardaydu ay helaan waxqabadyo isku xiran oo lagu taageerayo marin u helkooda casharka heerka fasalka. Bartayaasha Luqadaha Badan Ku Hadla waa inay marin u helaan waxbarista Af-Ingiriisiga ka Luqad Labaad ahaan (ESL) iyo ilaha luqadda hooyo si ay u taageeraan waxbarashadooda, oo ardayda naafada ah waa inay marin u helaan taageerooyin gaar ah si ay ugu guuleystaan goob loo dhan yahay oo ay ka barbar waxbartaan asaagooda. Bartayaasha Luqadaha Badan Ku Hadla waxaa la saari doonaa oo keliya si ay u helaan tilmaamaha waxbarista toska ah ee ESL ee aan si kale loogu heli karin fasalkooda. BPS

waxay sidoo kale horumarin doontaa cutubyo tababar iyo tababarsiin ah si loo xaqiijiyo in qorshayaasha waxbarasho ee shaqsi ahaaneed (IEPs) ee loogu talagalay ardayda naafada ah ay tiro iyo tayo ahaanba horumarsan yihiin, ku habboon yihiin arday kasta hantidiisa iyo baahidiisa. Horumarka iyo kormeerka ay hageyso xogta barnaamijka IEP waxaa lagama maarmaan ah in dib loogu laabto aqoonsiga xad-dhaafka ah ee ardayda Madow iyo kuwa aan caddaanka ahayn iyo bartayaasha luqadaha badan ku hadla sida xaqdarada ah ugu meeleeyay goobo si aad ah loo gaaryeelay. Si tani loo gaaro, fasalada waxbarashada guud waxaa loo qaabeeyey inay taageeraan qaababka kala duwan ee waxbarida iyo barashada. Qorshayaasha shaqaaleynta waxay ka wareegi doonaan shaqsiyaad go'an, hal macallin oo ku saleysan fasalka una wareegi doonaan kooxo dabacsan, dhaqdhaqaaq leh oo ka taageeraya arday kasta inuu helo waxbarashada heerka-fasalka.

3. **Qorsheynta ku saleysan kooxda iyo iskaashiga**
   BPS waxay horumarin doontaa qorsheynta ku saleysan kooxda iyo iskaashiga si ay u kobciso mas'uuliyad wadareed ee dhammaan ardayda ku nool bulshada dugsiga. Horumarinta xirfadeed ee la hiigsanayo waxay dhisi doontaa awoodaha gudaha ee dugsiyada iyo kooxaha hogaanka si ay u habeeyaan oo ay u abuuraan fursado ardayda wax lagu baro goobaha waafaqsan adeegyadooda IEP iyo baahiyaha horumarinta luuqada Ingiriisiga. Kahor wareega miisaaniyadda sanad dugsiyeedka SY24-25, Kooxaha Qorshaynta U Dhanaanshaha ee ku sugan iskuul kasta waxay hadda ka shaqeynayaan inay aqoonsadaan, khariidadeeyaan, oo ay falanqeeyaan gaarsiinta adeegga hadda ee ardayda naafada ah iyo bartayaasha luqadaha badan ku hadla oo ay soo jeediyaan talooyin ku saabsan dib-u-habeynta kheyraadka loogu talagalay hirgelinta ee heerka dugsiga ah.

4. **Dib u samaynta Nidaamyo Taageero iyo Isla Xisaabtan**
   Hirgelinta wax ku oolka ah waxay u baahan doontaa caqabado hawlgal ah oo heer Degmo ah si ay si wanaagsan u taageeraan bulsho kasta oo iskuul, oo ay ku jiraan miisaaniyad-dejinta istiraatiijiyadeed, shaqaaleynta, iyo qorsheynta booska. Isbeddeladaan waxay ugu dambeyntii bixin doonaan adeegyo joogto ah oo buuxa oo ka dhex jira bulsho kasta oo dugsi, iyagoo hubinaya in dhammaan ardayda iyo qoysaska ay helaan khibrad arday oo tayo sare leh oo u dhow guriga. Isbeddeladaan nidaamsan ayaa la kala saari doonaa muddo dhowr sano ah. Qorsheyntu waxay ka bilaabatay dugsi kasta, halka isbeddelada qaab-dhismeedyada laga fulin doono heerar fasal oo gaar ah, iskuul kasta, laga bilaabo sanad dugsiyeedka SY24-25.

Qorshaha Waxbarshada Loo Dhan Yahay waxaa la qorsheyn doonaa lana hirgelin doonaa shanta sano ee soo socota ee dugsiyeed.

Kormeeraha Guud waxay u mahadcelisay Kuxigeenka Madaxa Adeegyada iyo Taageerada Xafiiska Adeegyada Gaarka ah Olga Garriga, Kuxigeenka Madaxa Adeegyada Gaarka ah Lauren Viviani, iyo Kuxigeenka Madaxa Howlgalada & La Xisaabtanka Xafiiska Luqadaha Badan & Waxbarashada Dhaqamada Kala Duwan Brittany Baggett shaqadooda ku saabsan Qorshaha Waxbarashada ee Loo Dhan Yahay.

Marwo Polanco Garcia waxay sheegtay inay tusaale u tahay u dhannaanshaha oo ay ku faraxsan tahay in lagu salaamo afkeeda hooyo. Waxay walaac ka muujisay in ardayda Af-Ingiriisiga kooban garanaya lagu meeleyn doono fasalo ay dhigtaan arday ku hadla Af-Ingiriisiga. Dr. Chen waxay sharraxday sida degmadu u adeegsaneyso shaqaale istiraatiiji ah si ay u taageerto uruurinta badan ee ardayda ku hadla isla luqadda. Waxay xaqiijisay ballanqaadka degmada ee barista afka hooyo. Marwo Armstrong waxay faahfaahin ka bixisay adeegyada isku-dhafan ee ay BPS siiso ardayda dhowaan timid dalkan, oo ay ku jiraan marin u helka luqadda hooyo. Marwo Polanco Garcia ayaa weydiisay haddii BPS ay tixgalisay abuurista guddi gudaha ah si ay u qiimeeyaan baahiyaha iskuulada gaarka ah.

Kulanka Isku Dhafka ee Guddiga Dugsiyada Boston

Bruce C. Bolling Municipal Building
2300 Washington Street
Rugta Guddiga Dugsiga
Roxbury, MA 02119

Oktoobar 18, 2023

Dr. Alkins wuxuu wax ka weydiiyay istiraatiijiyadaha shaqaalaha ee degmada si ay u taageeraan bartayaasha luqadaha badan ku hadla iyo marka natiijooyinka ardayda la filayo inay soo hagaagaan. Dr. Chen wuxuu sheegay in degmadu ay sahamineyso dhiirigelinta shaqaalaha ee jooga meelaha baahiyaha badan ay ka jiraan. Marwo Seale ayaa ka hadashay muhiimada ay leedahay awoodsiinta
qoysaska iyo barida ardayda isu-doodista.

Mudane Tran wuxuu weydiiyay su'aalo ku saabsan sinnaanta habka meelaynta ardayda, shahaadeynta macallinka iyo kartida, ku darista talada qoyska, iyo falsafadda degmada iyo adeegsiga hanashada luqadda. Dr. Chen wuxuu aqbalay inuu dabagalo jawaabaha.

Marwo Lima Barboa waxay muujisay taageerada waxbarashada loo dhan yahay ee bartayaasha luqadaha badan ku hadla, iyadoo sheegtay in ardayda maanta ay u lug yeeshaan Af-Ingiriisiga iyagoo adeegsanaya aalado badan oo dhijitaal ah. Waxay weydiisay sida degmadu uga fikireyso adeegsiga tikniyoolajiyadda si ay u taageerto waxbarashada loo dhan yahay. Dr. Chen ayaa dabageli doonta.

Mudane Cardet-Hernandez ayaa wax ka weydiiyey yoolalka natiijooyinka ardayda. Dr. Chen waxay sheegtay in guusha qorshaha ay tahay in lagu cabiro marka loo eego heerarka koritaanka. Waxay sheegtay in kooxda aysan cabbiro gaar ah soo saarin sababtoo ah qroshuhu waa mid ah shaqada degmada oo dhan. Waxay sheegtay in degmadu ay go'aamin doonto cabir lagu raad raaco ardayda aadka u badan ee naafada ah iyo ardayda sida aadka ah sida gaarka ah loogu meeleeyey iskuulada gaarka ah. Mudane Cardet-Hernandez wuxuu weydiiyey macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan aruurinta macluumaadka ee dib u eegista saddex-biloodlaha ah iyo sida macluumaadkaas loola wadaago qoysaska. Dr. Chen waxay sheegtay in qaar ka mid ah dib-u-eegista saddex-biloodlaha ah laga sameeyo dhinaca aragtida Qorshayaasha Tayada Dugsiga ee lala wadaago DESE loona heli karo si furan. BPS waxay sidoo kale warbixinnada u gudbisaa Waaxda Caddaaladda oo ku saabsan u hoggaansanaanteeda bartayaasha luqadaha badan ku hadla. Waxay caddeysay ballanqaadka degmada ee ay ku ballaarineyso hannaanka xulashada dugsiga ee loogu talagalay ardayda luqadaha badan ku hadla iyo ardayda naafada ah. Mudane Cardet-Hernandez wuxuu weydiiyay sida guusha ay u ekaan doonto, sida iskuulada ay u qorsheeyeen waxbarasho loo dhan yahay, gorgortan la'aanta degmada, iyo qaababka heerka sare ah. Dr. Chen waxay sheegtay in kuwa aan gorgortanka ahayn ay yihiin mas'uuliyadaha degmada ee hoos imanaya qawaaniinta gobolka iyo federaalka si ardayda wax loogu baro deegaanada ugu xaddidaada yar. Waxay u soo qaadatay Dugsiga Higginson K0-2 inuu tusaale u yahay u dhannaanshaha heerka sare ah. Dr. Chen ayaa ku dabagali doonto macluumaad dheeraad ah.

Mudane O’Neill waxa uu dib u xasuusiyay Shaqadii Gudida Dugsiga ee u Dhannaanshaha ee 2014-2015. Waxa uu weydiiyey sida degmadu uga shaqeyneyso inay xaqiijiso inay jirto iskaashi heer kasta ah si looga dhigo u dhannaanshaha inuu u shaqeeyo si sax ah. Dr. Chen ayaa sheegtay inkasta oo ay jirto kala duwanaan xagga diyaargarowga ee guud ahaan iskuulada iyo hoggaamiyeyaasha iskuulada dhexdooda, degmadu waxay qabaneysaa shaqada qorsheynta waxayna diyaarineysaa taageerooyinka saxda ah si ay waxbarashada degmada oo dhan ee loo dhan yahay uga dhigto mid guul leh. Mudane O’Neill wuxuu weydiiyey akhbaar ku saabsan dib-u-habeynta barnaamijyada IEPs iyo arrimaha gaadiidka ee ardayda naafada ah. Marwo Seale ayaa sheegtay in arrimahaas ay mudnaanta koowaad yihiin. Kooxdeeda waxa ay si dhow ula shaqeyneysaa DESE si ay dhammaan shuruudaha ugu buuxiso waqtigii loogu talagalay. Mudane O’Neill wuxuu weydiiyay sida iskuulada ay qoysaska oogala xiriiraan isbedeladaan iyo qiyamka waxbarashada loo dhan yahay? Dr. Chen ayaa sheegtay in dugsi kastaa uu dejisto hiigsi isla markaana uu wakiil waalid ku yeesho kooxda qorsheynta loo dhan yahay. Dugsiyada waxa ay intaa kadib kala xiriiraan
bulsho weynta. Kooxda dhexe waxa ay Golaha La-talinta Waalidka ee Waxbarashada Gaarka ah (SPED PAC) kala shaqeyneysaa inay qoysaska la socodsiiso isbeddeladaan. BPS waxay qaban doontaa fadhiyo dhageysi ah iyo shirarka qoysaskeena si ay runtii uga qeybqaataan qorsheynta iyo hirgelinta labadaba.

Bruce C. Bolling Municipal Building
2300 Washington Street
Rugta Guddiga Dugsiga
Roxbury, MA 02119

Oktoobar 18, 2023
Marwo Robinson ayaa weydiisay kooxda inay dabagal ku sameeyaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan la hawlgelidda degmada ee qoysaska ardayda luqadaha badan ku hadla iyo shaqaalaha dugsiga.

Mudane Cardet-Hernandez wuxuu wax ka weydiiyay saameynta miisaaniyadeed ee ay leedahay ballaarinta waxbarashada loo dhan yahay. Kormeeraha Guud waxay sheegtay in koox hawleed kala duwan ay si joogto ah uga kulmayaan adeegsiga kheyraadka si ka duwan sidii ay u taageeri lahaayeen shaqadan.

FAALLADA DADWEYNAHA *(SII SOCDO)*

Ann Chinchilla DeGeorge, deggan Roxbury waalidna ka ah Boston Latin Academy, waxay ka marag kacday taageerada ardayda leh qorshayaasha 504, kaqeybgalka waalidka, iyo soo jeedinta ah in loo guuro Dugsiga O'Bryant.

Ruby Reyes, deggan Dorchester oona ah agaasimaha fulinta Dallada Caddaaladda Waxbarashada Boston, ayaa ka marag kacday kaqeybgalka bulshada.

Vernee Wilkinson, aan deganeyn Boston, xubin ka ah Golaha La-talinta Qoyska ee SchoolFacts Boston, ayaa ka marag kacday kaqeybgalka qoyska.

Kime Emery, degan Galbeedka Roxbury waalidna ka ah Boston Latin Academy, ayaa ka marag kacay taageerada ardayda naafada ah.

Jeanie Gorlovsky-Schepp, deggan South End waalidna ka ah Boston Latin School, wuxuu ka marag kacay xiriir la'aanta ka timid BPS ee ku saabsan taageerada ardayda iyo naceybka kadhanka ah Yuhuuda/Islaamka.

Deirdre Manning, deggan Dorchester waalidna ka ah Murphy K-8 School and charter school, waxay ka marag kacday walaac ku saabsan siyaasada imtixaanka aqbaalada iskuulada ee hada jira.

ARIN CUSUB

Midna.

SOO XIRIDA

La ansixiyay **-** Abaaro 10:58 p.m. Guddigu wuxuu ansaxiyay mooshin dib loogu dhigayo kulanka iyadoo la isugu wada raacay.

Xaqiijinta:

Elizabeth Sullivan
Xoghayaha Fulinta